

Dugsiyada dadweynaha Minneapolis waxay qaban doonan barnaamijka Winter Break Maalinta Isniinta, bisha Diseembar 24 – ilaa iyo maalinta jimcaha bisha, Janno 4. Fasalada caadiga ahna waxay dib u bilaaban doonaan maalinta isniinta bisha, Janno 7.

Hoos waxaa ku xusan ilo kheyraad oo loogu talo galay qoysaska inta lagu jiro xiliga fasaxa qaboobaha.

Cuntooyinka iyo mac-macaanka fudud

Goobahaa soo socda waxay bixin doonaan adeegyada iyo cuntooyinka yar yar inta lagu jiro xiliga qaboobaha. Maalmaha iyo xiliyada ama saacadaha adeegyada way kala duwan yihiin, hadaba dadka aadka u daneeynaya waxaan ku dhiiri galinaynaa in ay goobahaan si taads ah ula xiriiraan wixii warbixino dheeraad ah.

- [Audubon Park](#)
- [Bottineau Park](#)
- [Central Gym Park](#)
- [East Lake Library](#)
- [Farview Park](#)
- [Luxton Park](#)
- [Northeast Library](#)
- [Powderhorn Park](#)
- [Webber Park Library](#)
- [Whittier Park](#)

[FoodPantries.org](#) waxay hayaan liiska goobaha cuntooyinka laga bixinayo iyo meelaha laga bixinayo (soup kitchens).ururo culnto karinaaya ayaa ka mid ah.

Barnaamijyada iyo waxqabadyadooda

[Minneapolis Park and Recreation Board](#)

xarumaha waa ay furan yihiin xiliga qaboobaha (xarumaha waa ay xiran yihiin maalmahaan oo dhan Dec. 25 iyo bisha Jan. 1) howlaha kormeerida waxqabadyada bilaashka ah. Waxaad ka helaynaa liiskooba oo dhameystiran goobaha xarumaha madadaalada, adiga oo booqanaya [www.minneapolisparcs.org](#).

[Maktabaada Hennepin County Library](#)

Maktabadaha Magaalada Minneapolis waa ay furan yihiin inta lagu jiro xiliga qaboobaha Winter Break waxay hayaan howlaha madadaalada dhalinyarada iyo qoysaska. Ka raadso goobaha iyo xarumaha maktabadaha iyo saacadahooda [www.hclib.org](#).

Baahiyada kale

[United Way 211](#)- United Way 211 waxay bixinayaan macluumaad bilaash ah iyo adeegyo caafimaadka oo asturan oo ku saabsan macluumaadka warbixinada caafimaadka iyo adeegyada dadka gobolka Minnesota. Kaalmooyinka waxaad ku heli kartaa dhammaan luuqadaha. Taleefanada waxaa laga jawaabayaa 24 sacad maalin kasta, 7 todobaadka oo dhan. United Way 211 waxay ku xiraysaa qoysaska iyo wixii macluumaad ah oo ay ka midka yihiin, cuntada, dharka diiran ee laga xidho qaboobaha, iyo qalabka ciyaalka ku nciyaaraan iyo hadiyado. Soo wac 211 ama 651.291.0211.

[MPS Family Resource Center](#) waxay bixiyaan ilaha kheyraadka iyo adeegyada bulshada oo ay u diyaariyaan qoysaska iyo ardaydooda dhigta dugsiyada dadweynaha Minneapolis. Xarunta waxtarka qoysaska waxaad ka qabsan kartaa ballan ama waad iska imaan kartaa; wixii macluumaad dheeraad ah iyo saacadaha soo wac qadka taleefanka 612.668.4281.